

**Amar L. 20 rep**

**Ganaaxyada la xiriira Maamulka Dowladda Hoose.**

**MAAMULKA WASAAYADA TALYANIGA EE SOMALIYA**

**MAAMULAHAD**

Kadib marki la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamb 2357 ee 9 Disember 1952;

Kadib markii la aqoonsaday baahida in la naadimiyo qaabka guud ee ganaaxyada iyo habka loo fulin doono ganaaxyadaasi ee Maamulka Dowladda Hoose;

Kadibmarkii la arkay qodobka 8 ee Heshiiska Maamulidda dhulka Somaliya;

Kadib markii la arkay qodobka 4 ee Baaqa Mabaadi'da Dastuuriga ah eek u lifaaqan Heshiiska Maamulida;

Kadib markii la arkay qodobka 4 ee dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 2357 ee 9 Disember 1952.

**WAXAA LA AMRAY**

**Qod. 1**

Kadib markii laga reebo ganaaxyada ku tilmaaman sharciyada kel, ganaxyada ku qoran xeer nidamiyaha dowladda hoose iyo kuwa la xiriira adeegyada dowladda hoose waxa gaari doonaan ilaa So. 400.

Xalaadaha culus waxaa la muteysan doona xarig ilaa iyo 20 beri.

Ciqaabahaasi oo kale waxaa lagu muteysan doona amaradaauu soo saaro Guddomiyaha deegaanka o aan ka tirsaneyn aagaga dowlada hoose.

Warbixinta laga qoray ganaxaasi waa in si cad u muujiyaa in racfaan laga qaataay ganaxaasi.

**Qod. 2**

Ganaxa lagu tilmaamay qodobka sare, waxaa loo ogol yahay in ciddii la ganaaxay ay dhiibto wixii lagu ganaaxay, haddii uu rafcaan ka qaadanay waa in lagu caddeyo warqadda rafcaanka lacagta xadidan oo uu siiyey sarkaalka go'aamiyey ganaxa isaga ah.

Sarkaalka goyey ganaaxa waa in uu siiya ciddi la ganaxay rasiidka oo kala ah asal iyo nuqul oo laga jari doono buugga isku dheggen oo horay Madaxa Dowladda Hoose ay shabbad ku soo dhufatay.

Haddii aan si kale loo dhigin, cidda la ganaaxay waxaa loo ogol yahay in uu bixiyo 6 u dhig ee ganaxa uu muteystay.

Cafiska lama oggola haddii falku u dhiibato u geysanayo cid seddaxad ama Maamulka Dowladda Hoose, taas oo kallifeyso in lagu dabaqo amaradda qodobka soo socda.

**Qod. 3**

Haddii wax cafis ah aysan jirin, sida ku xusan qodon sare ku xusan, oo ganaaxu dood galo, ilaa iyo 10 beri waxaa laga oggolaan doonaa in uu soo codsado bixinta cafiska daraaded lacag ganax oo u dhigmada 3 u dhig ganaxa loo qondeyey falalka uu galay.

Haddii uu rafcaan noqon mid xaadir ah, waxaa lagu qori doona wargelinta in ciddii ganaaxa muteystay oo muddo 10 beri gudahooda la soo xaadiracodsi codsi cafis Madaxa Dowladda Hosose.

10ka beri markii ay dhamaato, ciddi la ganaaxay in uu bixiyo cafiska awgeed lacag u dhigmata 3 u dhig ganaaxa dembiga uu galay.

Haddii falalka ganaaxa keeynay ay gaarsinayaan dhibaato cid kale, waxaa Madaxa Dowladda Hoose kadib markii uu dhegeystay dhibanaha uu diidi kara in uu aqbalo codsiga cafiska.

Kadib markii laga reebo xalaadaha ku tilmaaman xeer-nidaamiyaha lamba. 19 ee 11 Sebtember 1954, Madaxa Dowladda Dowladda Hoose, haddii falalku ay dhibaato u geysanaayaan Maamulka Dowladda Hoose wuxuu ku talin karaa in dembilaha geystay falalkaasi oo baa'biyo muddo la xadiida gudahooda dhibaatada ka soo aroorta falalkaasi.

Haddii muddada loo qabtay ay dhamaato iyadoo aanan xal laga gaarin, codsiga cafiska waa la diidi doona, Madaxa Maamulka Dowladda Hoose waxay amri doonta fulinta, waxaa la amri doona in la fuliyo howlahada iyo hababka ku xusan qod. 1 ee xeernidaamiyaha lamba. 19.

#### **Qod. 4**

Haddii ciddii falalkaasi gashay ay soo xaadiri weyso Madaxa Maamulka Dowladda Hoose muddada la carifay, ama isi soo xadiristiisa kadib uusan suubsan wax codsi cafis ah, warbixin ganaaxa waxaa loo gudbin doona Maamulka Dowladda

Hoose iyo Garsooraha Gobolka si loo bilaabo xukunka ciqabta.

Amarkaani waxaa lagu dabaqi doona markii ciddi debiga gashay aysan bixinin lacagta loogu tala galay cafis ahaan ama markii codsiga cafiska la diiday.

#### **Qod. 5**

Bixinta lacagta cafiska waxay tireysa fal dembiga.

#### **Qod. 6**

Maamulku wuxuu soo saari doonaa dekreetoyin oo qayixi doona nidaamka lagu fulin doonon Amar-sharcigaan.

Muqdisho, 11 Sebtember 1954.

Maamulaha

**Martino**